

Waalidiinta shafta leh/ Mas'uuliyiinta ubadka,

Waxaan rajeynayaa in aad si wacan oga bogataan fariintaan adiga iyo qoyskaaga. Waanu dareensanahey in badan oo adinka inka mid ah in ay xaalad adag ama hubinti la'aan ay jirto, inaguna waxaan rabnaa in aa iin xaqiijino bad-qabka, fiyoobidda, iyo sharafta ardeydeena iyo howl-wadeenada ay yihiin mudnaanta ugu sareysa.

Sida waafaqsan tilmaamaha uu Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota, askarta ICE looma oggola in'ay gudaha u galaan dhismayaasha iskuulka ama ay ku sii nagaadaan nawaaxiga uu iskuulka maamulo iyagoon haysan warqad garsoor oo ansax ah. Iskuulkeena markasta waxa uu u hogaansamaya sharciga inaga oo sameyneyna wax kasta oo awoodeena ah in aan ku ilaalino ardeyda badqabkooda, xasiloondooda iyo waxbarasho si habsami leh ku socota.

Xiligaan waanu fahansanahey in qoysaska qaarkood ay walwal la soo daristey . Qoysaska u baahan in ay waxbarashada ubadkooda hab fogaan arag ah loogu dhigo, fursaddaasi waa ay u furantahey, hadii aad dooneyso in aad xog intaan dhaafsiisan ogaato, fadlan la xariir qofka ugu haboon ee maamulka ka mid ah oo aad ka helo karto xogtaan.

Dugsige Hoose: Maamulaha kala xariir 651-645-1000. Ext. 139

Dugsiga Dhexe: Maamulaha kala xariir 651-645-1000. Ext. 103

Dugsiga Sare: Maamulaha kala rariir 651-369-7555. Ext. 409

Inaga oo aad u aaminsan waxbarashada sida tooska ah in ay siiso ardeyda waayo-aragnimo, waanu xushmeyneynaa qoyskasta xaalka uu ku suganyahey waana idinka la shaqeyneynaa sidii aanu ku caawin laheen ardeyda sidii ay u heli lahaayeen waxbarshadooda.

Hadii askarta ICE ay yimaadaan ama ay ka soo ag-dhawaadaan dhismaha iskuulka xiliga ardeyda la soo fasaxayo, ardeyda waxaanu ku heyndoonaa gudaha dhismaha si badqab kujirto, waanu la soo socodsiineynaa qoysaska isla markiiba inaga oo isticmaaleyna robocall codka la soo diro iyo fariimo qoraaleed. Ardey la soo fasaxayo majiridoono inta aanu ka habsaneyno in ay tahey xili mudan, kuna haboon badqabka ardeyda.

Tani waa mid aanan caadi aheyn iyo xaalad adag, balse fadlan ogow kaligaa matihid. Bulshada iskuulka waxa uu ku saleysantahey qadarin iyo wadashaqeyn. Waa ay inaga go'antahey in aanu ka gudubno tani si wadajir ah iyo in aanu isgarab istaagno midba midka kale.

Qadarin iyo is-daryeel,

Samuel Yigzaw